



# PORTLAND PUBLIC SCHOOLS 2025

## SHAPE THE FUTURE OF OUR SCHOOLS

### **Su'aalaha Sida Badan La Is-waydiiyo**

#### **Waa Maxay "Dugsiyada Guud ee Portland 2025"?**

Dugsiyada Guud ee Portland (PPS) waxa ay ku jiraan waqti kororkoodu sareeyo, waxaa jira tiro go'aana ah oo ay degmadu doonayso in ay ka gaadho mustaqbalka kol hadii uu koror xoogani jiro islamarkaana ay u meel mariso muhimaduhu sida ay u kala horeeyaan. Oregon's Kitchen Table waxa ay marti gelinaysaa sahan xaga shabakada ah laga bilaabo 1da, April - 1da, May, 2015ka, sahankani waxa uu ku waydiin doonaa su'aalo xidhiidh ah oo la xidhiidha mudnaanta barnaamijyadeeda - sida xuduudaha, barnaamijyada waxbarasho, u sinaanta fursad u helida dugsiyo tayo sare leh, dhismayaasha, iyo meelaynta dugsiyada dhexe si loo far fiiqo qiimaha iyo tan loo aaminsan yahay in ay bulshada horumar u yihiin. Sidoo kale PPS waxa ay qabtaan gaadhida iyo ka warhaynta golaha ee degmada oo dhan si ay u dhagaystaan qoysaska intii la gaadhi karo - gaadh ahaan kuwaa aan codkooda sida badan la maqal - iyadii oo la adeeganayo sahankaa (shabakada iyo warqada). Kolka lagu daro Oregon's Kitchen Table oo isu duway hagida isu soo baxa bulshada, halka xaafada, saaxiibada, kooxaha bulshada, iyo kooxaha kale ee yaryar ay ku kulmi karaan islamarkaana ay doodo la xidhiidha su'aalaha ku qabsan karaan. Dadaalkaas ayaa sare u qaada Dugsiyada Guud ee Portland 2025ka.

#### **Sidee sahanku ugu xidhiidhsan yahay dib-u-eegida xuduuda?**

Madaxa Dugsiyada Degmada Carole Smith waxa ay isu duwday District-wide Boundary Review Advisory Committee (D-BRAC) Gudi ka kooban Maamulayaal, macalimiin, waalidiin iyo khubaro xirfadlayaal ah - Si ay ugu caawiyaan iyada iyo Golaha dugsiya go'aan ka gaadhida xuduudaha dugsiyada ee mustaqbalka. Arday walba oo PPS dhigta waxaa lagu qoray dugsiyada deriska ah iyadii oo loo eegayo halka ardaygu ku nool yahay, halka ardayda qaar ay dhici karto in ay dhigtaan dugsiyo kale sababo kala duwan awgood.

Degmadu waxa ay kala calaamaysaa xaafadaha si ardayda loogu qoro dugsiyada xaafadahooda ku yaala. PPS waxa jira dugsiyada qaar ay arday yari isu diiwaan gelisay halka qaar kale ay buux dhaafeen dhismayaasha. Degmadu waxa ay xooga saartay in ay eegto dhamaan xuduudaha dugsiyada islamarkaana ay isbedel ku samayso sanad dugsiyeedka 2016-17 iyo wixii ka dambeeya.

#### **Xagee sanhanku ka imanayaa?**

Sahankan waxaa isu duway gudi ka kooban howlwadeenada Oregon's Kitchen Table, Portland State University representatives, PPS staff, iyo Xubno ka tirsan District-wide Boundary Review Advisory Committee (D-BRAC).

Shape the future of our schools. • Vamos a diseñar el futuro de nuestras escuelas. • Kiến tạo tương lai của trường học chúng ta.

• Повлияйте на будущее наших школ. • 塑造了我們學校的未來。 • Qaabeynta mustaqbalka dambe ee dugsiyadeena.

Portland Public Schools is an affirmative action and equal opportunity employer.

## Portland Public Schools 2025

### **Waa maxay sababta sahankan ama isu taga bulshada aan uga qayb qaadanayaa?**

Dugsiyada Guud ee Portland 2025 waa fursad ay PPS ku dhagaysan karto bulshada oo dhan. Maxsuulka waxaa qayb ahaan la gaadhsiin doonaa gudiyada PPS, howlwadeenada PPS, Madaxa Dugsiyada Carole Smith iyo Golaha PPS. Waxa aad dooran kartaa in aad kaga qayb qaadato sahanka (shabakada ama warqada caadi ah) ama waxa aad la kumi kartaa saaxiibada, waalidinta, deriska, ama xubnaha bulshada si aad ugu wada sheekaysataan su'aalaha.

### **Waa maxay isu taga bulshada?**

Isu taga bulshadu waa fursad deriska, saaxiibada, iyo xubnaha bulshada iyo kooxaha kale ee yaryari isku arki karaan iyadii oo laga doodayo su'aalaha ku qoran sahanka Dugsiyada Guud ee Portland 2025. Hadii aad danaynayso in aad marti geliso isu tag noocaas ah fadlan booqo. <http://oregonskitchentable.org/portland-public-schools/> si aad u hesho nuqul la xidhiidha maccluumaadka isu taga bulshada.

### **Yaa qaadanaya sahankan?**

Cid walba oo ku nool Degmada Dugsiyada Guud ee Portland ayeey u furan tahay in ay ka qayb qaataan, kolka lagu daro waalidiinta/hagayaasha idman, aradyda, iyo howlwadeenada iyo weliba deganayaasha degmada ee aan iyagu ubadka haysan.

### **Waa maxay sababta ay bulshada oo idili uga wada qayb qaadanayso?**

Portland waa magaalo danaynaysa dugsiyadeeda guud . Bulshada guud - kolka lagu daro qoysaska PPS ee imika, Qoysaskii hoe ee PPS, Qoysaska PPS ee mustaqbalka, xaafadaha, kooxaha bulshada iyo kuwa kale - kuwa u doonaya dugsiyada xaafadaha oo tayo sare leh dhamaan ardayda. Dugsiyo sare waxa ay qayb ka qaataan dhismaha magaalo sare oo aannu kuligeen yeelano.

### **Waa maxay danta PPS ee xaafadayda, heerka waxbarashada, nooca jinsiga, aragtida jinsiga, isirka iyo halka aad ka soo jeedo ee la isku wayiyey sahanka?**

Qof walba waxa aan waydiinaynaa in uu ka warceliyo sahanka tan la xidhiidha macluumaadka, tani kol walba qaban ma ahan in aad ka jawaabtaa, oo keliya waxa aannu doonaynaa in aannu hubino in aan dhagaysanay bulshada oo idil.

### **Maxaad ka samayn doontaa jawaabahayga?**

Macluumaadka sahanka waxaa adeegsan doonaa Degmada Dugsiyada si ay uga caawiso go'aan ka gaadhida xuduuda dugsiyada, barnaamijyada waxbarasho, nidaamka isdiwaan gelinta iyo bedelka, dhismayaasha, iyo meelaynta ardayda. Warcelintaadu waa u asaasi D-BRAC, oo iyagu ka shaqaynaya isbedelka xuduudaha ee sanad dugsiyeedka 2016-17. Dhamaan warcelinadu waa qaroodi iyadii oo aan lagu lifaaqi doonin magacaaga ama halka lagaaga xidhiidhi karo sida u qabo nidaamka [Oregon's Kitchen Table's privacy policy](#).

Shape the future of our schools. • Vamos a diseñar el futuro de nuestras escuelas. • Kiến tạo tương lai của trường học chúng ta.

• Повлияйте на будущее наших школ. • 塑造了我們學校的未來。 • Qaabeynta mustaqbalka dambe ee dugsiyadeena.

Portland Public Schools is an affirmative action and equal opportunity employer.

### **Sidee iyo Halkee ayaan ka qaadan karaa sahanka?**

Waxa aad uga qayb qaadan kartaa sahanka Portland Public Schools 2025 dariiqado kala duwan laga bilaabo 1da April–1da May, 2015:

- Ka qaado sahanka xaga shabakada [www.oregonskitchentable.org](http://www.oregonskitchentable.org)
- Daabaco sahanka <http://www.pps.k12.or.us/>. oo ku soo celi jawaabtaada dugsiiga.
- Ka qaado sahanka oo daabacan xafiiska dugsiiga kuugu dhow.
- Haddii adiga ama – koox dada ah – aad danaynaysaan in aad marti gelisaan isu taga bulshada iyo wada sheekaysi sahankaa la xidhiidha (isu taga bulshada) , waxa aad macluumaadka aad u baahan tahay ka rogan kartaa <http://oregonskitchentable.org/portland-public-schools/>

### **Waa ayo Oregon’s Kitchen Table, waa maxay sababta aan u adeegsanayaa aqalkooda shabakada?**

Oregon’s Kitchen Table waa qayb ka mid ah Portland State University’s Policy Consensus Center iyo isu duwaha Portland Public Schools 2025. Macluumaad dheeraad ah fadlan booqo [www.oregonskitchentable.org](http://www.oregonskitchentable.org). Shabakada oo aad sahanka ku qaadaa ayaa haboon waayo sahanka PPS ee aad ku qaadataa shabakada waxa ay caawinaysaaa in si sahlan loo wadaago warcelinada sahanka.

### **Oregon’s Kitchen Table muxuu ka yeelayaa macluumaadka isdiiwaangelinta aan siiyey?**

Kolka aad ka qayb qaadato sahankan Oregon’s Kitchen Table, jawaabaha aad bixisay waxaa lagu wargeleinayaa National Policy Consensus Center ee ku yaala Portland State University si ay u uruuriyaan waraaqahaa. Kolka aad sahanka ka warcelinayso, xisaabtaada waxaa lagu xidhiidhinayaa jawaabta sahankaaga iyadii oo ay la socoto nambarka aqoonsi ee uu computer-ku sameeyey. Warcelinada sahanka marnaba lama baahin doono iyadi oo aan loo eegaynin khusuusi iyo qaab guud toona. macluumaad dheeri ah oo la xidhiidha nidaamka Oregon’s Kitchen Table halkan ka eeg; <http://oregonskitchentable.org/privacy-policy/>.

### **Maxaan uga baahnahay in aan xisaab ka samaysto Oregon’s Kitchen Table si aan u qaato sahanka Portland Public Schools 2025?**

Xisaabta aad ka furataa Oregon’s Kitchen Table waxa ay fursad kuu siinaysaa in aad qaadato sahanka. in aad qayb ka noqotaa Oregon’s Kitchen Table waxaa ku soo gaadhi doona sahanka PPS iyo maxsuulka sahankii aad qaadatay. Waxa aad joojin kartaa qaadashada sahanka oo aad misana u soo laaban kartaa si aad dib ugu bilowdo inta lagu jiro mudadaa loo qabtay 1 April - 1 May. Waxa aad sidoo kal ewax ka bedeli kartaa macluumaadkaaga sida E-mail-ka ama cinwaanka haka aad degan tahay. Xisaabtani waxa kale oo ay Oregon’s Kitchen Table u saamaxaysaa in ay hubiyaan in qof waliba uu sahankan mar keliya qaatay.

## Portland Public Schools 2025

### **Sidee ayuu u huban yahay macluumaadka sahanka Oregon's Kitchen Table?**

Macluumaadka is diiwaan gelinta waxaa ogaan kara ookeliya howlwadeenada National Policy Consensus Center. PPS waxba kama ogan karto macluumaadka ku xidhiidhsan xisaabta ashkhaasta ka qayb qaadanaya sahankan.

### **Ma haysto Computer ama Email. Sidee uga qayb qaadan karaa sahanka Portland Public Schools 2025?**

tarFadlan booqo xafiiska dugsiyada xaafadaada ama mid un ka mid ah ururada bulshada ku xidhan degmada. waxa aad ka heli kartaa nuqul sahanka ah oo ku qoran luqadaha English, Chinese, Spanish, Somali, Russian and Vietnamese.

Shape the future of our schools. • Vamos a diseñar el futuro de nuestras escuelas. • Kiến tạo tương lai của trường học chúng ta.

• Повлияйте на будущее наших школ. • 塑造了我們學校的未來。 • Qaabeynta mustaqbalka dambe ee dugsiyadeena.

Portland Public Schools is an affirmative action and equal opportunity employer.

**Waxa aan ku hadlaa luqad aan ahayn kuwaa la tarjumay. Xagee caawinaad ka heli karaa?**

Sahanka Portland Public Schools 2025 waxa lagu tarjumay luqadaha Chinese, Spanish, Somali, Russian iyo Vietnamese. Caawinaada luqado aan kuwaa ahayn, fadlan la xidhiidh luqada (503) 916 3589.

<b>Khadka Luqadaha</b>	<b>Nambarada</b>
中文   Chinese	(503) 916-3585
Español   Spanish	(503) 916-3582
Soomaaliga   Somali	(503) 916-3586
Русский   Russian	(503) 916-3583
Tiếng Việt   Vietnamese	(503) 916-3584
Other Languages	(503) 916-3589

**Dhibaataa iga hayata qaadashada sahanka, yaan la xidhiidhaa oo caawin kara?**

Sarah Giles, Madaxa Mashruuca OKT, [sarahgiles@pdx.edu](mailto:sarahgiles@pdx.edu) iyo (503) 725-5248.

**KALA XADHIIDH**

**Portland Public Schools**

Kim Fox-Middleton, Community Involvement & Public Affairs	<a href="mailto:kfoxmiddleton@pps.net">kfoxmiddleton@pps.net</a>
---	--

**Online on Oregon's Kitchen Table**

Sarah Giles, Oregon's Kitchen Table Technical Assistance for Oregon's Kitchen Table	<a href="mailto:sarahgiles@pdx.edu">sarahgiles@pdx.edu</a> 503.725.5248
Jessica Rodrigues-Montegna, Oregon's Kitchen Table Questions regarding hosting a house party.	<a href="mailto:montegna@pdx.edu">montegna@pdx.edu</a> 503.725.8195

4-1-15